



## Iskaa isaga baaridda Covid-19 ee Dalarna

Haddii ay jiraan calaamado, waa in aad adigu ballan uga sameysataa shaybaarka. Hal mar oo keliya ayaa aad soo gudbin kartaa muddada aad jirran tahay. Waana kaliya dadka calaamada leh kuwa iska soo baaraaya.

**Iska baariddu wax lacag ah kuma fadhiyo.**

**Qaabka loo sameeyo iska baaristu waa ay kala duwan tahay iyada oo ay hadba ku xiran tahay da'da**

**Ka aqri wax dheeraad ah bogga doxooyinka gobolka:** [www.1177.se](http://www.1177.se)



Skaam lambarka QR taleefankaaga gacanta si aad ugu tagto bogga internetka

### **Dadka waa wayn iyo dhallinyarada laga soo billaabo 13 sano**

Adigu waa in aad ballan ka sameysataa si aad iskaa isaha baarto covid-19 (PCR tijaabda) ee Dalarna haddii waxyaabaha soo socda ay adiga dhab kuu yihiin:

- Adigu haddii aad leedahay astaamo lagu garto covid-19
- Adigu haddii aad leedahay astaamo lagu garto ugu yaraan 24 saacadood
- Adigu haddii aad tahay kuwa loogu yeedho la xiriirayaasha guriga, oo walibana lagugu war galiyay in aad iska soo baarti doonto
- Adigu haddii aad tahay mid uu soo galay raadka cudurada faafa waa in aad iska soo baarto.

Adigu waxa aad iskaa iskaga baari kartaa iyada oo dheecaan laga qaadayo sanko iyo cunaha adigoo isticmaalaya qoriga suufka leh ee shaybaarka. Waalidiinta ama qofka ah masuulka ilmaha waa in ay ka caawiyaan dhallinyarada da'doodu ka yar tahay 16 jir in ay iska baaraan.



# SÄTERS KOMMUN

Adigu waxa aad ka geli kartaa adeegga e-ka 1177 meesha hagaha daryeelka caafimaadka oo leh Mobile BankID, BankID, Freja e-id plus ama e-aqoonsi kale. Waxaad dooraneysaa goobta saami qaadista iyo waqtiga.

## **Carruurta laga soo billaabo 10 sano illaa iyo 12 sano**

Waalidka ama qofka masuulka ka ah ilmaha waxaa lagula talinayaa in ay ballan qabsadaan si ay iskood isaha soo baadhaan haddii:

- Ilmuhu haddii uu leeyahay astaamo lagu garto covid-19
- Ilmuhu haddii uu leeyahay astaamo lagu garto ugu yaraan 24 saacadood
- Ilmuhu haddii uu yahay kuwa loogu yeedho la xiriirayaasha guriga, oo walibana lagugu war galiyay in aad iska soo baarti doonto
- Ilmuhu haddii uu yahay mid uu soo galay raadka cudurada faafa waa in aad iska soo baarto.

Waalidiinta ama qofka ah masuulka ilmaha waa in ay ka caawiyaan carruurta. Waalidiinta ama qofka kale ee ah qofka masuulka ka ah ilmaha waa in ay galaan adeegga e-ka 1177 meesha hagaha daryeelka caafimaadka, waana in ay u ballamiyaan shaybaarka dhanka xagga wakiilka, iyo in ay isla markaasna ka caawiyaan in uu ilmuhu maro shaybaarka

## **Carruurta ka laga soo billaabo fasalka barbaarinta illaa iyo 9 sano**

Waalidiinta ama qofka kale ee masuulka ka ah ilmaha waxaa lagula talinayaa in ay ballan u qabtaan si looga baaro ilmaha, taas oo ay sameeynayaan shaqaalaha rugta caafimaadka

Waalidiinta ama qofka kale ee masuulka ka ah ilmaha waa in ay wacaan rugta caafimaadka oo ay ballan ka qabtaan si looga baaro caabuqa